

X.W. (Xeer Wasiir) 21 Novembre 1960, lamba. 100.

Imtixaan u-qamid (u-suubanaanta)

WASIIRKA

Markuu tixgeliyey baahida loo qabo, sí loo helo dad la hubo, xulna ah xagga diarinta Qaalliyo ah maalinyaal iyo khuburo xagga Shareecada Islaamka, oo la geliyo imtixaanka u-qalmidda (u-suubanaanta) oo horey loo soo sheegay;

Markuu arkay Qod. 83, faqradda kowaad, ee Dastuurka;

WUXUU XEERINAYAA

Qod. 1

Waxaa la soo badhigayaa tartan imtixaan u-qalmi (u-suubanaanta) oo loogu talagay Qaalliyaalka ah maalinlayaal iyo khuburo xagga Shareecada Islaamka oo shaqeyaa.

Qod. 2

Imtixaanka waxa uu ka dhacayaa Muqdisho, maalinta ah 30^{ka} Noofember 1960 iyo ka dame, saacadda marka ay tahay 9^{ka}, wuxuu ka dhacayaa xarunta Maxkamadda Sare, wuxuuna ka koobnaanayaa imtixaan isugu jira qoraal iyo af, oo maadooyinka soo socda: Shareecada Islaamka, habraaca dacwadaha Shareeda Islaamka iyo aqoon guud.

Qod. 3

Guddiga imtixaan-qaadayaasha waxa uu ka koobmaa Jaallayaasha (saadada) kala ah:

- Jaalle Shekh Cali Ismaaciil Cabdi, Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Diinta iyo caddaaladda, guddoomiye;
- Jaalle Shekh Cabdiqani Shekh Axmed — Xubin;
- Jaalle Shekh Ibraahim Maxamuud — Xubin;
- Jaalle Shekh Cali Axmed Aadan — Xubin;
- Jaalle Shekh Cabduraxmaan Faarax — Xubin.

Xubin kasta waxa ay xaq u leedahay toban dhibcood, imtixxa waliba. Waxaa imtixaanka af-ahaaneed u gudbaya musharaxiinta hela (keena) buundo ah ugu yaraan tobakiiba lix, ee codadka imtixaan-qaade kasta, xagga imtixaanka qoraalka ah, laguna dhawaaqo in ay u qalmaan kuwa ugu yaraan dhibco isla eg ka keenay xataa imtixaan waliba oo af ahaan ah.

Qod. 4

Daneeyayaasha, ayaga oo aan keenin sabab cudur-daar leh, aan gelin imtixaanka waxaa loo qaadanayaa in ay yihiin kuwo shaqada istiqaaloo ka keenay.

Qod. 5

Kulanka kowaad Guddigu, haddii ay la habboonaato, waxa uu iska dhex dooranayaa hal

ku-xigeen guddoomiye oo ka wakiil noqonaya guddoomiyaha, haddii uu maqnaado midkan dambe.

Muqdisho, 21 Nofeember 1960.

Maxamuud Axmed Maxamed

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 3, Xaashi lamba. 125.

Muqdisho, 31 Disember 1960.

Hantidhowraha: **Axmed Dahir**